


WAADARASHADA DADWEYNAYA EE DUGSIYADA H/DHEXE SOOMALIYEED



Baro Qoysakeena



SAFKA KOOWAAD

1

Waa urur cashar-diyaarinno ah looguna talagalay inay kaalmeeyaan baraya ~~aa~~ u dhiga safka Koowaad ee dugsiyada asaasiga ah. Cashar-diyaarinnadaasi waxay ku salay ~~aa~~ yihiin mowduucyo hore ugu jirey manhajka Xisaabta, Sayniska iyo Cilmiga Bulshada.

Xisaabta Safka Koowaad tirinta iyo kala-soocidda.

Sayniska Safka Koowaad qiyaasidda culayska iyo joogga.

Cilmiga Bulshada Safka Koowaad dadka inagu meersan iyo siday u noo ~~aa~~ yihiin.

Moojuulkani waxa uu ka kooban yahay lix cashar-diyaarinnood. Kuwaas oo taxan ~~aa~~ aan loo qaadan karo, ama hab kasta oo waafaqsan qorsha-hawleedka baraha.

Cashar-diyaarinnadani waa sidan soo socota:

Casharka Koowaad Barashada kooxaha.

Casharka Labaad Qiyaasidda culayska iyo joogga.

Casharka Saddexaad Barashada dugsigeenna.

Casharka Afaraad Barashada dugsigeenna iyo beshiisa.

Casharka Shanaad Barashada qoysaska (shaqadooda).

Casharka Lixaad Barashada qoysaska (doorarkooda).

Ujeedooyinka Waxbarasho.

1. In lagu kaalmeeyo carruurta siday u qabatami lahaayeen deegaanka dug ~~aa~~
2. In lagu kaalmeeyo carruurta siday u fahmi lahaayeen fikradaha tirinta iyo ~~aa~~ soocidda.
3. In lagu kaalmeeyo carruurta sare u qaadidda xirfadaha, soo ururinta ~~aa~~ iyo habayntooda.

1. Fasalka, dugsiga, qoyska ama beeshu waa kooxo dad ah oo isku dan ah. Kuwaas oo loo kala saarayo kooxo yar-yar iyadoo la adeegsanayo astaamahooda gaar ahaaneed. (Da'da jinsi iwm).
2. Kooxahaas oo ka soo jeeda dadweynaha, kuwaas oo meel ku wada nool waqtii go'an.
3. Tirada dadka beesha waxa beddela dadka imaanshihiisa iyo tegiddiisa, taasi markay dhacdo waxa isbeddela tirada ardayda fasalka iyo dugsigaba.
4. Qoysasku waxay ku kala duwan yihin qaabkooda, laakiin dhammaantood waxay qorsheeyaan, isla markaana go'aamiyaan siyaabaha ugu habboon ee ay u isticmaali lahaayeen khayraadka degaankooda.

Casharrada oo dhami waxay ku bilaabmaan "fal bilow" waxaana ku xiga "fal barasho" "fidin" iyo "naqtii taxane ah".

Ujeeddada laga leeyahay qorshayaashan waxay tahay in barayaasha la siiyo afkaar iyo dariiqooyin kala duwan oo ah kuwa ugu habboon ee ay adeegsan karaan ilaa heer.

Guud ahaan xoogga waxa la saaray (mudnaanta la siiyey) falka (waxyaalaha laga hadli karo, waxyaalaha la qaban karo). Gaar ahaan carruurta wax baranaysa. Wixaannu isku daynay in aan dhiirrigelinno carruurta ayagoo barahooda la kaashanaya inay fikiraan, kana hadlaan, qabtaan, iskoodna xal ugu helaan arrimaha yar-yar ee la soo kulma, waxaannuna aaminsannahay inay arrintani xiisa weyn ku abuuri karto, kuna dhowaado inuu dareemo waxbarasho dhab ah. Dariiqadan carruurta ayaa door weyn ka ciyaaraysa. Tani ayey ku noqonaysaa waxbarasho mid midho dhalisa.

Cabdi Ibraahim Cawaale.

Maxamed Maxamuud Haddi.

Shamis Maxamed Nuur.

Tony Johnston.

Mashruuca waxbarashada Dadweynaha.

Wasaaradda Waxbarashada & Barbaarinta.

CASHARKA KOOWAAD.

"Barashada Kooxaha"

Ku Bilow.

B. Baruhu waxa uu ku bilaabi karaa casharkan isaga oo tusa ardada buugga xaadiriska ah.


Dabeeto weydiya. Waxa uu buuggani yahay?

Maxaa baruhu magacyada u yeedhiyaa xisad walba?


Maxaynu ku ogaannaa xaadirinta ardada? (Inta joogta iyo inta maqan)

Magacyada ardada ee rejistarka ku jiraa maxay ka kooban yihiin. ?


Maxay ka




Jooge



Maqane



Wiilal



Qoyskeenna

Gabdho



Immisa jir
baynu nahay




meesha aan
ku noolnahay

T. Baruhu waxa uu casharkan ku bilaabi karaa isaga oo weydiya ardayda..... ama koox arday ah inay ka caawiyaan yeedhinta rejistarka.


Diyaar-garow waxa uu samayn karaa toddobaad ka hor bolwga casharkan, waxaana uu koobid ku samaynayaa sabuuradda Sida:

	SABTI	AXAD	ISNIIN	TALAADO	ARBACO	KHAMIIS
Jooge	22	21	20	23	23	24
Maqan	4	5	6	3	3	2
Isugeyn	26	26	26	26	26	26


Fal Barasho.




1. Ardaydu waa inay dheddooda isu-qaybiyaan koox-koox wax tirisa; tusaale:
Kooxda B. Ha tiriso ardayda fasalka oo dhan..... Isla markaa ha isku kooxayso.
Kooxda T. Ha tiriso wiilasha fasalka ku jira ha iskuna kooxayso.
Kooxda J. Ha tiriso gabdhaha ku jira fasalka ha iskuna kooxayso.
Kooxda X. Ha tiriso ardayda da'deedu tahay 6 jir ama 7 jir ama 8 jir ha iskuna kooxayso.
2. Ku sawir sabuuradda wixii aynu soo aragnay (aad ayey u fududdahay waxayna la mid tahay tan kor ku sawiran).
3. Ku dhiiriigeli carruurtu inay sawiraan sawir-uleed oo ayaga ah kuna caawi carruurtu may magacyadooda hoos ka qoraan marka ay sawiraan. Sidee baan isugu kooxaynaa sawirra-daasi kala geddisan?




27




17



10




7




Cabdi

4. U oggolow carruurtu inay ku sameeyaan tijaabooyin kooxaha kale

Sida koox ah kuwa dugisga u soo lugeeya



iyo koox ah kuwa dugsiga ku yimaada baabuurta



Hana tiriyaan inta ay koox waliba ka koobon tahay, isla markaa ha u soo gudbiyaan macalinka waxay heleen.

5. Doodda fasalka iyo nakhtiinka

Fasalkeenna ma wiilasha ayaa ku badan mise gabdhaha?

Fasalkeenna ma waxaa ku badan 6 jirka..... mise 7 jirka?

Fasalkeenna ma waxaa ku badan kuwa jooga mise kuwa maqan?

Ardaydu ma weydiin kartaa sababta?

ka badan?
ka badan?
ka badan?

Nuxurka casharkan ama casharradan waxa lagu naqtiimi karaa sida tan

1. Ardayda oo la weydiyo inay ku buuxiyaan tiro meelaha ka bannaan sheekadan soo socota.

Fasalkayga, rajistarka waxa ku qoran carruur ah.

Maanta waxa jooga waxaana maqan

Fasalkeyga waxa wiilal ah waxaana gabdho ah..... iwm.

2. Carruurta oo loo sheego inay ogeysiin ku hor dhajiyaan fasalkooda. (Waxa la isticmaali karaa warqad adag iyo tabaashiir ama qalin iyo warqad cad).


Kani waa safkii koowaad Dugsiga.

Waxaana dhigta fasalkayga arday.

Waxa wiilal ah gabdhana waxa ah

Magaca macallinkayagu waa

Kani waa safkii 1aad
waana 28 arday
16 wiil iyo 12 gabdhood.



3. Shaqada ay ardadu ku soo qabanayso guryahoodu waxa ay noqon kartaa mid ay ku soo tirinayaan koox kale tusaale ahaan..... xoolaha ay dhaqdaan qoysaskoodu (ido, riyo, lo',.... iwm.)



Tirada qoyskoodu uu ka kooban yahay.


Tirada awoowayaashood, ayeyaashood,

00 (2)



tirda hooyooiyinkood,

0 (1)



tirada aabbayaashood.

0 (1) iwm.




CASHARKA LABAAD.



"Qiyaasidda joogga iyo culayska".

Ku Bilow.

- B. Baruhu waxa uu ku bilaabi karaa casharkan isaga oo carruurta fasalka dibaddiisa u soo saara una safa sida ay u kala dhaadheer yihiiin.



- T. Baruhu waxa uu casharkan ku bilaabi karaa isaga oo ardayda geeya garoonka carruurtu kubbadda ku ciyaarto ee dugsiga. Wuxaan u soo qaadayaa dhagax dusha ka siman ama wax la mid ah loox ama qori isla markaa waxa uu ardayda ka codsanayaa inay laba isku-miisaan dhawiba fuulaan dhinacyada looxa, dabeetana uu qiyaaso waxa ka soo baxa leexada.



Fal Barasho.

1. Ardayda waxa lagu dhiirrigelin karaa inay sameeyaan qiyaas joogeed oo kala geddisan tusaale; warqad dheer oo dhuuban ayaa lagu dhajinayaa gidaarka, waxa aad soo qaadanaysaa ul dheer oo la c...nadiyey (qiyaasay) ka dibna waa inay ardayda lafteeedu qiyaastaa, sameeyaan avac...isticmaalaya senti-mitiro.


- 
2. Ayagoo fikradahaa isticmaalaya ayaa ardayda lagu caawin karaa inay soo saaraan.....
1. Inta dhererkisu le'eh yahay wiilka fasalka ugu dheer?
 2. Inta gaabnidiisu le'eg tahay wiilka faslaka ugu gaaban?
 3. Waa maxay dhererka gabadha ugu dheeri? Iyo gabadha ugu gaaban?
 4. Carruurta dhaadheeri ma ka weyn yihiin kuwa gaagaaban?
 5. Wiilashu ma ka dhaadheer yihiin gabdhaha?
 6. Carruurta dhaadheeri ma yihiin kuwa ugu culays badan?
 7. Kuwa gaagaabanina ma yihiin kuwa ugu culays yar?.... Haddii aanay ahayn sababtu waa maxay?
3. Ku caawi carruurta fasalka guduhiisa in ay sameeyaan weedh jawaab u ah su'aalaha sare oo ay ku qortaan buugaagtooda. Matalan:

Xasan waa wiilka ugu dheer fasalka. Waxaana uu gaadhaa
Madiina waa gabadha ugu dheer gabdhaha. Waxaana ay gaadhaysaa


e

Layli dabagal ah.

1. U oggolow inay carruurta ugu dhaadheeri fasalka dhexdiisa kaga hadlaan qoysaskooda.
(Aabbayaashood iyo hooyoooyinkood miyaa aad u dhaadheer?)
 2. U oggolow inay carruurta ugu gaagaabani fasalka dhexdiisa kaga hadlaan qoysaskooda.
(Aabbayaashood iyo hooyoooyinkood aad miyay u gaaban yihiin?)
 3. U oggolow inay carruurta ugu culayska badani iyo kuwa culayska yariba ay habcaa raacaan.
 4. Immisa wiilal iyo gabdho ah ayaa la walaalo ah carruurta ugu dhaadneer?
- Ku taswiir sawirka qoyska/qoysaskooda sabuuradda.




5. Immisa wiilal iyo gabdho ah ayaa la dhashay carruurta ugu gaagaaban ama culasyka yar?
 Ku taswiir sawirka qoyska/qoysaskooda sabuuradda.



6. Carruurta u oggolow inay ka hadlaan fasalka dhexdiisa waxyaabaha ay ku soo quraacdeen subaxan. Kuwa ugu buur-buurani ma waxay soo cuneen quraac aad u badan ?

Xasan?

Muus



Canjeero



Caano





Cabdi?

Caano Muus



Nakhtiin :

1. Adiga oo isticmaalay arbiga dambe ee fasalka waxaad ku samaysaa xarriiq u dhexeysa gu gaaban carruurta. Inta kalana hagasho meesha xarriiqada kaga habboon "garaafka"






2. Sii wad qiyaasidda xarriiqdaasi ku samaysan darbiga fasalka, si carruurtu u ogaato sida deg-degga ah ee ay u korayaan.

CASHARKA SADDEXAAD*"Barashada Dugsigeenna"*

Ku Bilow : Sida ugu wanaagsan ee aad casharkan ku bilaabi kartaa, waxa weeye adigoo carruurta ku soo wareejiya fasallada, xafiisiyada, musqullaha iyo meelaha kale ee dugsigu leeyahay. Wuxaan aad ogaataa in carruurtu barayaasha fasallada kale ay su'aalo weydiyaan ku saabsan carruurta fasalladoodu inta ay tiradoodu dhan tahay, da'dood. Isla markaa waa in ay carruurtu soo arkaan ceelka dugsiga biyaha siiyaa halka uu ku yaallo.

Fal Barasho.


1. Marka ay carruurtu ka soo noqdaan booqashadii ay ku aadeen fasallada kale, waa in baruhu ku dhiirrigeliyaa carruurta sidii ay wadajir ugu samayn lahaayeen "Khariidada" dugsiga sabuuradda fasalka ama dhulka fasalka hortiisa ah. (Sida tan hoose oo kale)




2. Hubi in carruurtu ay ku daraan khariidadoo :-

1. Fasallada iyo safafka.
2. Xafiiska maamulaha.
3. Xoghaynta dugsiga.
4. Xafiiska barayaasha.
5. Ceelka dugsiga ama meesha dugsigu biyaha ka helo.
6. Musqulaha.
7. Garoonka carruurta.


3. Ku dhiirrigeli in carruurtu ay ka hadlaan dadka kala duwan ee ka shaqeeya dugsiga.



Maamulaha.
Barayaasha.
Adeegayaasha ama ilaaaliyaasha.
Nadiifiyayaasha, iwm.



4. U tilmaan carruurta in ay sheegaan siyaabahay u caawin karaan in dadkaasi gutaan waajibaadkooda.



Nadaafadda fasalka oo ay ilaashaan



Ka ururinta dhagaxyada iyo quraaradaha garoonka lagu ciyaaro.





Ka shaqaynta beerta dugsiga.

Waraabinta dhirta dugsiga ku taalla.

Naqtlin.

1. (Inta aan la bilaabin layliga, baruhu waa inuu soo ogaadaa carruurta dhigata safafka sare ee dugsiga.) Carruurta safkani ha soo martiqadaan laba carruur ah oo ka kala tirsan safka 7aad iyo 8aad oo ka hadla fasalladooda. (Hubi in barayaasha carruurtani ogtahay martiqaadkan.)
- Immisa carruur ah ayaa fasalkeenna dhigata (safka koowaad) Safka Koowaad

Immisa carruur ah ayaa safka siddeedaad ku jira ?



Safka Siddeedaad

Maxay? (maxay carruur badani ugu jirtaa safka 1aad) Caado ahaan waa sidaa.

Tijaabooyin aan ku samaynay casharkan carruur badan ayaa dhibaato kala kulmay inay jawaabta gartaan. Laakiin waxa fahamkii u fududaad markii aanu weydiiney su'aalahsan

Ma jiraan guryo cusub oo dhawaan laga dhisay meesha aynu degennahay?

ma ogtahay qoysas qolol cusub ku daraya guryahooda?

(Guryo cusub macnaheedu: "waa dad cusub" qolal cusubina: "waa ubad cusub"
(?)

2. Ku dhiirrigeli carruurta, layli shaqo guri, ayaga oo weydiinaya aabbayaashood iyo hooyooyinkood meelihii ay ku dhasheen. Ma beeshan bay ku dhasheen mise tuulooyinka ama magaaloojin kale?

Weydii wixii ay soo qoreen. (Immisa carruur ah ayaa meel kala ka yimid?)

Xaalku sidee buu noqonayaa haddii sannadkan 10 qoys oo cusubi ay degaan meeshan oo ay intuba leeyihiin wiil ama gabadh lix jir ah dhammaantoodna ay wada jeclaystaan inay dugsi galaan. Ma u baahan nahay in aynu dhisano dugsi ka weyn kii hore u jirey?

Xaalku sidee buu ahaanayaa haddii qoysaskii joogey dhammaantood ay goostaan inay tagaan Magaalada ugu dhaw. Maxaa ku dhacaya tirada ardayda dugsiga?


3. Weydii carruurta inay ka fikiraan waxa dhacaya sannadkan haddii ay dhashaan 100 carruur ah oo dheeraad ah. Goormaa ayaa dugsigu u baahanayaa barayaal iyo qolal dheeraad ah.

4. Baruhu waxa uu ku soo gaba-gabayn karaa casharkan isaga oo isugeeya tirada ay carruurtu ka soo ururisay fasalladii ay booqdeen. Carruurtuna waxay ku xasuusan karaan waxay soo barteen ayaga oo sheekadan meelaha bannan buuxiya kuna qora buugga cilmiga beesha

Magacayga waxa la yidhaahdaa (Ardayda qaar waxay u baahan-yihiin in macallinku Caawiyo)

Waxaan dhigtaa dugsiga

Waxa dhigta arday, waxaana wax ka dhiga bare iwm.



CASHARKA AFARAAD

"Barashada dugsigeena iyo beeshiisaba"

Ku Bilow :


Macallinku casharkan waxa uu ku bilaabi karaa isaga iyo carruurta oo socdaal yar ku kala bixiya deegaanka dugsiga.

Markay ka soo laabtaan socdaalkaasi ayuu baruhu mar labaad khariidad ku muujinaya meesha ay beeshu deggan tahay. Wuxaan calaamad saarayaa meelaha muhiimka ah, sida :-

1. Masaajidaka ugu dhaw.
2. Meesha baabuurta laga raaco ee ugu dhaw,
3. Kawaanka (Masaradda) iyo dukaamada ugu dhaw.
4. Makhaayadaha ugu dhaw.
5. Bukaan jeefka ugu dhaw.

Fal barasho.

1. Isagoo saldhig ahaan u isticmaalaya khariidada darbiga ama dhulkaba ayaa baruhu carruurta ku caawin karaa siday khariidada ugu soo saari lahaayeen jidka ay u soo maraan dugsiga marka ay ka imaanayaan guryahooda. Tusaale; ka gudbid wado ay baabuurta iyo dadkuba ay ku badan yihiin.
Ag socod webi
Ka fogaansho xayawaan



2. Weydii carruurta inay sheegaan hababka kala geddisan ee ay ku yimaadaan dugsiga:
Tusaale: Immisa ayaa ku yimaada dugsiga:-

Lug.

Baabuur.

Bas.

Baabuur var (fatuurad).

Sidee carruurta intooda badani ku timaadaa dugsiga?

Waxa soo socda sheeko gaaban oo la doonayo in carruurtu ku dhammaystirto (dood)

“Sannadkan saddex qoys oo cusub ayaa soo degay Balcad, qoys kastaaba waxa uu lahaa wiil ama gabar oo ay imminka dugsiga ugu hureyso. Carruurta magacyadooda waxa la kala yidhaahdaa Madiina (oo ahayd siddeed jir) Yuusuf oo ahaa 6 jiriyo Maxamed 00 7 jir. Maalintii ugu horreysay ee ay ka ag tagtay hooyadeed. Yuusuf iyo Maxamedna waxay dareemeen qariibnimo. Laakiin carruurtii reer Balcad ahayd ayaa markiiba soo dhaweesey oo qariibni-madii ka saaray”.

Sidee baad u malaynaysaa in carruurtii Balcad ay u caawiyeen carruurtii cusbayd ?

Maxay doonayeen in carruurtan cusubi ogaato?

Xaggee baad u malaynaysaa inay ka yimaadeen qoysaskan iyo carruurtoodu?

Waalidiintu waxay u yimaadeen inay beeralay noqdaan maxay qaban jireen intaanay iman Balcad ?

Ma beeraley ayey ahaayeen Ma reer-miyi bay ahaayeen Ma magaalo bay ku noolaayeen?

baruhu waxa uu caawin karaa carruurta inay qoraan hababka kala geddisan ee ay ayagu gacan uga geysan la haayeen dejinta ilmada cusub ee dugsiga.

Tusaale:Barasho saaxiib cusub.

U tilmaamidda musqulaha (Baytalmeyada).

U tilmaamidda meesha lagu keydsado kutubta.

Tusidda dukaanka ugu dhaw



Nakhtiin.


1. Baruhu waxa uu ku bilaabi karaa dooddiiisa baahida uu leeyahay qoys cusub oo doonaya inuu dego meel cusub.

Dooddu waxay ku bilaaban kartaa baraha oo weydiya carruurta baahidooda



DOONID?


2. Waa maxay baahida qoysas meel cusub degay? Isla markaa sidee baynu u dareen siineynaa inaanay ahayn dad qariib ah?






Tusaale:

In la tuso kawaanka (Masarada) iyo meelaha wanaagsan ee waxlagu iibsado, laguna caawiyo siday u samaysan lahaayeen beer khudradeed, isla markaa dadka kalana loo bari lahaa, lagana caawiyo sidii guri loogu heli lahaa, amasidii qalabka la hoos dhigo guriga loogu lahaa iwm.

Marka qoysas badani ay soo degaan meeshii aad ku noolayd durbadii isbeddel ayaa ku dhacaya dhulkii waayo dadku waa isku wada baahi Maxay tuuladaadu, magaaladaadu ama caasimadaadu siin kartaa? (baraha ayaa kuwan soo socda sabuuradda ku qoraya carruurtuna ha ka dooddyaan mid kasta.)



Guryo badan.
Biyo badan.
Dugsiyo badan.
Barayaal badan.
Gaadiid badan.




Waddooyin badan.

Koronto badan ama batrool badan.

Bukaan socod ^{egato}badan.

Kalkaaliyayaal badan.

Suuqyo badan.



CASHARKA SHANAAD*Barashada Qoyska*

Ku bilow Baruhu waxa uu ku bilaabi karaa casharkan jadwalka fasalka ama buugga uu baruhu ku qorshaysto shaqadiisa (haddii uu jiro) iyo su'aalo uu carruurta weydiyo:

- Maxaynu ku qabannay fasalka maanta?
- Maxaynu qorshaysannay inaan qabanno berri?
- Jadwalku muxuu ina tusaa?
- Maxaa ku jira qorshaha shaqada baraha?
- Maxaad jeceshahay in lagu daro jadwalka?
- Maxaynu jadwal u leennahay?

8:00	Xisaab.
8:30	Akhris.
9:00	Qoraal.
9:30	Higaad.
10:00	Waqtiga sheekada

Macallinku waxa kale oo uu casharkan ku bilaabi karaa sheeko ku saabsan hooyo suuqa ka soo adeeganaysa. Hooyooyin badan ayaa marka ay suuqa ka soo adeeganayaan sii samaysta liis ah alaabtay soo iibsanayaan, si aanay u kala ilaawin waxay doonayeen. Marka uu halkaa marinaayo ayuu carruurta weydiin karaa siday hooyooyinku u sii qorshaystaan diyaarinta cuntada qoyska.



Fal barasho: (Hiiro gaar ah. Soomaaliya waxa jira qoysas kala duwan, sida ugu fududee aad u kala saari kartaa waa shaqadooda. Tusaale, 55% qoysaska Soomaaliyeed waa reer guuraa, 20% waa beera-qodato, inta soo hadhay oo ah 25% waxay ku nool yihiin magaalooyinka. Faahfaahinta arrintan waxa lequ dhigan doonaa safka 2aad).

1. Baruhu waa in uu ku taswiiraa warqad ballaadhan ama sabuuradda sawirkan:

Axmed oo reer guuraa ah
iyo qoyskiisa.

Ismaaciilkii beero-qodatada
ahaa iyo qoyskiisa.

Faadumadii bakhaarka
haystay iyo qoyskeeda.



2. Baruhu waxa uu weydiinayaa carruurta su'aalahan soo socda: Axmed iyo qoyskiisa

1. Axmed muxuu qabtaa maalin walba?
2. Xoolhu dhaqdaa waa kuwee?
3. Dhirta ay cunaan xoolahaasi waa tee?
4. Cuntada ay Axmed iyo qoyskiisu ka helaan xoolihiisu waa maxay?
5. Waa nooceee dharka ay Axmed iyo qoysaskiisu ay xidhaan?
6. Waa nooceee guriga ay Axmed iyo qoyskiisu ku nool yihiin?
7. Maxay maalin walba qabataa afada Axmed?
8. Maalin kasta carruurta Axmed maxay qabtaan?
9. Muxuu Axmed iyo qoyskiisu uga tagaan meel oo ay u degaan meel kale?
10. Muxuu Axmed iyo qoyskiisu ka fikiraan, isla markaa u qorshaystaan maalin walba, toddobaad walba ama sannad kasta.

"Ismaaciil iyo Qoyskiisa"

1. Ismaaciil muxuu maalin kasta qabtaa?
2. Waa maxay waxa uu beeraa?
3. Sidee buu u abuuraa una goostaa abuurkaasi?
4. Ayaa ka kaalmeyn kara Ismaaciil shaqada beerta?
5. Waa maxay cuntada ay Ismaaciil iyo qoyskiisu cunaan?
6. Waa maxay dharka ay xidhaan Ismaaciil iyo qoyskiisu?
7. Waa nooceee guriga ay Ismaaciil iyo qoyskiisu ku nool yihiin?
8. Xaggee bay ka helaan Ismaaciil iyo qoyskiisu biyaha iyo shidaalka?
9. Xaggee buu Ismaaciil ka iibiyaa midhaha uu soo goosto?
10. Waa maxay Ismaaciil iyo qoyskiisu ku fikiraan isla markaana ay qorshaystaan maalin walba, toddobaad kasta iyo sannad walba?

"Faadumo iyo qoyskeeda"

1. Faadumo maxay maalin walba samaysaa?
 2. Maxay ku iibisaa bakhaarkeeda?
 3. Xaggee bay ka heshaa alaabta ay hayso?
 4. Lacagtay hesho Faadumo maxay ku qabataa?
 5. Sidee bay Faadumo carruurteedu u caawin karaan?
 6. Waa nooceee dharkay Faadumo xidhataa?
 7. Waa nooceee guriga ay Faadumo ku nooshahay?
 8. Xaggee bay ka heshaa Faadumo biyaha iyo shidaalka?
 9. Waa maxay noocyada cuntada kala geddisan ee ay Faadumo iyo qoyskeedu cunaan?
 10. Waa maxay waxay Faadumo iyo qoyskeedu ka fikiraan isla markaana u qorshaystaan un ay sameeyaan maalin walba, todsobaad walba, iyo sannad walba? (Haddii Alla yiraahdo).
2. Doorasho ahaan baruhu waxa uu casharkan oo kale ku gudbin karaa muddo ka badan saddex casho, isaga oo kolba hal qoys qaadanaya, ama mar labaad baruhu waxa uu jeelaan karaa in uu ka sameeyo koox-koox fasalka, si dabeeto carruurtu ay dib uga soo warbixiyaan markay su'aal walba ka doodaan.


3. Ayadoo ay ku xidhan tahay hadba meesha uu dugsigu ku yaallo, ayaa baruhu ka fikiri karaa sidii ay carruurtu ugu sameyn lahayd socdaal gaaban agagaarka dugsiga, si ay waraysi ula yeeshaan beeraleyda ama xolo dhaqatada ama haddii ay magaalo tahay ganacsatada (socdaalkani waa in la sii qorsheeyaa ka hor intaan carruurta la bixin. Waa in socdaalku gaaban yahay, dugsiga iyo waalidiinta carruurtana waa in la ogeysiyyaa).

Nakhtiin:

- B) Baruhu waxa uu dood kala samaynayaa carruurta siyaabaha ay qoysaskaasi isaga midka yihiin iyo siday ku kala duwan yihiin. (Baahida aasaaska nolosha waa isaga mid, hase yeeshie, waxay ku kala duwan yihiin shaqooyinkooda. Baruhu waa in uu xoogga saaraa dhinaca ay iskaga midka yihiin).
- T) Baruhu waxa carruurta weydiin karaa in ay soo tebiyaan waxay qorshaysteen in ay qabtaan berri.... iyo waxa Axmed ama Ismaaciil ama Faadumo ay qorshaysteen in ay qabtaan. Mararka qaarkood wax baynu qorshaysanaa manafulino.Waa maxay waxa beddeli kara qorshaha ay sameysteen qoysaskaasi? Tusaale: Haddii uu rabo da'o.... Ismaaciil beertiisa ma qodi karaa? Faadumo ma socodsiin kartaa bakhaarkeedii? iwm.
- J) Macallinku waxa uu carruurta weydiin karaa waxay u jecel yihiin in ay qabtaan iyo waxay u neceb yihiin in ay qabataa.....


Si loo nakhtimo nuxurka casharkan baruhu waxa uu carruurta ku dhiirrigelin karaa isagoo weliba caawinaya:-

1. In ay taswiiraan guryaha ay ku nool yihiin Axmed, Ismaaciil iyo Faadumo.....



(Axmed muxuu ka shaqaynayaa maanta)?

**Axmed guriga ma joogo
Wuxuu jira.....**



**Waxa uu jiraa ... (Ismaacili maanta
Muxuu qabanayaa?)**

Ismaacili guriga ma joogo

2. In ay carruurtu taswiirto qoysaskaa oo shaqaynaaya.....

24



Raacidda Geela



Waraabinta dhirta



Qaadidda Miraha

3. U sheeg sheeko khayaaliya adiga oo isticmaalaya bilowyadan soo socda midkood.....

- b) Maalin maalmaha ka mid ah ayaa Axmed toosay, wuxuuna arkay in ay riyhiisii baxsadeen, ayagoo ka baxay meel ooddii ka bannaanaatay.....
- t) Aroor arocryaha ka mid ah ayaa Ismaaciil ehliyaddiisii soo booqatay. Wuxaana ay doonayeen in ay ka iibsadaan arabikhi (galley)..... Laakiin, Ismaaciil bakhaarkiisu waxba ugumay hadhin.....
- j) Galab galbaha ka mid ah ayey Faadumo xidhay bakhaarkeedii, wuxaana ay markiiba ogaatay in boorsadeedii lacagtlu ugu jirtay ay maqan tahay.....

CASHARKA LIXAAD

"Barashada qoysaska (Doorarkooda)"

Tilmaan bare: Waa in aad feejignaan gaar ah siisaa marka aad dhigeysid casharka qoysaska, si aanay carruurta agoonta ah ama kuwa ay kala tageen labadoodii waalid aanay u niyad jabin. Ujeeddooyinka casharkan laga leeyahay waxa ka mid ah in uu sareu soo qaado fahamka carruurta xagga kala duwanaanta dhismaha qoyska. Marka aad ka hadlaysid (doodeysid) kala duwanaanta waxa muhiim ah in baruhu xoogga saaro inta uu le'eg yahay faraqa u dhexeeya kala duwanaanta qoysasku, kaasoo caadi u ah bulsho kasta.

Ku bilow: B) Baruhu waxa uu ku bilaabi karaa casharkan isaga oo sabuuradda kutaswiira sawir uleed, kaasoo matelaaya dadka ku nool raaskiisa ama raaskeeda. (Waa la yaab, laakiin, waxa hubaal ah in carruur badani aanay rumaysnayn in baruhu ka tirsan yahay qoys ama uu la nool yahay raas kuwooga la mid ah).

Bare: Si kooban baruhu waxa uu ku bilaabi karaa casharkan isaga oo ka hadlaya qoyskiisa, qoyskeeda.

T) Baruhu waxa uu ku bilaabi karaa casharkan isaga oo carruurta weydiinaya in ay taswiiraan sawir-uleed oo matalaya dadka ku nool raasaskooda. Baruhu waxa uu ku caawin karaa carruurta in ay muujiyaan sawir kastaa qofka uu ka joogo, dabeeto sabuuradda uu ku qoro..... Hooyo, Walaashay, Ayeeyo, Walaalkey, Aabbo, Awoowe, Eedo, Adeer.



Hooyo



Aniga




Aabbe



Cali



Xasan



Aabbe Walaasha Adeer Awoowe

Eedo ama Habar-yar

Walaalka Ina-adeer

Ayeyeo.

26

Fal Barasho:


1. Ka dooro qaar carruurta fasalka ka mid ah oo ka hadla dadka raaskooda iyo waxay qabtaan.
2. Marka uu araartaa sameeyo carruurtu waxay baraha ka caawinaysaa in uu ku qoro raasaskooda sabuuradda.
- b) Waa maxay shaqada aabbayaashu ka qabtaan aqalka gudihiiisa iyo dibaddiisaba?

- t) Waa maxay shaqada hooyooyinku ka qabtaan aqalka gudihiiisa iyo dibaddiisaba?
- j) Waa maxay shaqada ay tirsanayaasha raasku ka qabtaan aqalka gudihiiisa iyo dibaddiisaba? (Kuwa waaweyn).
- x) Waa maxay shaqada ay carruurtu ka qabtaan aqalka gudihiiisa iyo dibaddiisaba?

Xaabo



U qubeyn ilmo



raadin ama
qorayaha dabka
lagu shito



Dhar dhaqid



Cunto karin.

Biyo dhaamin

- Marka aan dugsiga ka soo laabto
- Waxaan qoyska ka caawiyaa
- Waxaan qoyska ka caawiyaa
- Waxaan qoyska ka caawiyaa

3. Sida kale ee aad casharkan u gudbin kartaa waxa weeye isagoo carruurta weydiiya in ay ka caawiyaan in uu ku qoro sabuuradda waxa uu qabto raasku maalin walba.....

Tusaale: Toosid.

Tukasho.

Biyo raadin.

Sariir goglid (aqal hagaajin).

Quraac samayn (iwm).

Carruurta waa in lagu dhiirrigeliyaa in ay ka hadlaan jadwalka qoysaskooda iyo siyaabaha uu u kala geddisan yahay. Maxay lagama maarmaan utahay in aan maalin walba sameyno hab shaqo ee caadi ah ama nidaamsan? Maxaa dhici lahaa haddii aynaan lahayn jadwal?

4. Si uu baruhu u sheegi karo waxay tahay in uu carruurta weydiisyo in ay ka caawiyaan sidii uu ugu qori lahaa sabuuradda liis ah shaqo maalmeedka iyo qofka maamula amagooya waqtiga iyo sida shaqada loo kala qabanaayo. Tusaale:

Ayaa sariiraha goglaya?

Hooyo

Aabbe

Cid kale

Ayaa aqalka nadiifinaaya?

Ayaa biyaha soo dhaaminaaya?

Ayaa suuqa ka soo adeegaaya

Hooyo

Ayaa cuntada karinaaya?

Aabbe


Ayaa xoolaha raacaaya, arooraaya?

Cid kale

Ayaa beerta waraabinaaya, goynaaya, beeraaya?

Ayaa carruurta xannaanaynaaya?

Ayaa shaqada aabbaha qabta
marka uu xanuunsado?



Nakhtiin:

1. Fasalku waxa uu ka doodi karaa waxyaabahay soo qabteen.

Shaqada guriga dhexdiisa kee baa ugu waxqabad badan?

Shaqada guriga dibaddiisa kee baa ugu waxqabad badan?

Qoysaska qaarkood hooyooyinku waxay caawiyaan aabbayaasha guriga dibaddiisa.

Qoysaska qaarkood aabbayaashu waxay caawiyaan hooyooyinka guriga gudhiisa.

2. Si uu u tuso in shaqada qoyska gidihiisu isbed-beddesho, baruhu waxa uu weydiin karaa carruurta in ay ka dodaan:

1. Maxaa dhaca markay hooyadu umusho?

2. Maxaa dhici kara marka aabbuuhu uu xanuunsado?

3. Maxaa laga yaabaa in ay dhacdo marka ilmaha ugu weyni dugsiga aado?

4. Maxaa dhici kara marka ayeyyo kuu timaaddo si ay kula degto? iwm.

3. Isaga oo xoogga saaraya isku tiirsanaanta qoyska ayaa baruhu weydiin karaa carruurta in ay ka doodaan:

Siyaabaha ay u caawin karaan hooyooyinkooda iyo aabbayaashooda guriga dhexdiisa iyo dibaddiisaba. Carruurtu casharkan waxay ku nakhtiimi karaan ayagoo taswiira sawiro fudud oo muujinaaya mucaawinada av bixin karaan.

Tusaale: Suuqa oo ay tagayaan.

Guriga oo ay xaad hayaan (xaaqayaan).

Weelka oo ay xalayaan (Dhaqayaan).

Sariiraha oo ay goglayaan... iwm.

4. Sida kale ee nuxurka casharkan loo nakhtiimi karo waxa weeye carruurta oo dhammaystirta bilowyada soo socda:-

Maalin ayaa hooyaday xannuunsatay oo ay doontay inay isbitaal tagto

Intii ay isbitaalka ku maqnayd eeddo ayaa sii karisay cuntadii

Toddobaadkii horeaabbe wuxuu tagey aroos magaalo kale ka dhacayey

Aabe iyo walaal Cabdi ayaa yimid si ay noola joogaan

